

Waa maxay daaweynta beddelka?

Booliisku sidoo kale waxay baadhayaan daaweynta beddelidda, taasoo ah fal dambiyeedyo lagu isticmaalo habab ujeeddadoodu tahay in qofka lagu qasbo inuu beddelo, diido ama hoos u dhigo aqoonsigiisa jinsiga ama jihada galmada, taasoo si cad ugu habboon in qofkaasi uu ku yeesho dhaawac maskaxeed.

Maxaad samaynaysaa haddii aad tahay dhibane dambi nacayb

- **Marka hore raadso badbaado** – u tag badbaadada oo la xiriir qof aad ku kalsoon tahay
- **Booliska wac** – Haddi eey jiraan xaalad halis ah, wac 112. Ama la so xidhiidh booliska nambarkaan 02800
- **U fiirso waqtiga, goobta, sida saxda ah waxa la sheegay iyo waxa la sameeyay, iyo cidda joogtay**
- **Ilaali caddaynta** – kaydi fariimaha, sawiro ama muqaal. Waxna ha tirtirin ilaa aad la hadasho booliiska
- **Qof la hadal** – xarumaha taageerada dhibanayaasha dembigu waxay ku siin karaan taageero inta lagu jiro nidaamka. Tlf. 800 40 008
- **Noola xidhiidh**
- **Bulshada khibradda dembiyada nacaybka ee qaranka ayaa ku siin kara talo iyo tilmaam** – xitaa ka hor intaadan soo sheegin dembi
- La xidhiidh hay' daha ka shaqeeya arimo kala duwan oo dembi nacayb ah

Deegaanka khibradda qaran ee dambiyada nacaybka

Talo ma u bahantahay?

La xidhiidh Deegaanka khibradda qaran ee dambiyada nacaybka.

- Telefoon nambarka. 47488797
- E-mailka: oslo.hatkriminalitet@politiet.no

Ogeysiis:


- Adeegga waxa kaliya ee shaqeeya maalinta maalmaha shaqada. Haddii ay jiraan xaalado degdeg ah oo degdeg ah, soo wac nambarka booliska 112.



Adiga aan ku joogna



POLITIET
OSLO POLITIDISTRIKT



**Dadaalka
booliiska ee
ka dhanka ah
dambiyada
nacaybka**



Shaqada Booliisku Ka Qabto La Dagaalanka Dembiyada Nacaybka Ku Saleysan

Booliisku waxay leeyihiin unug qaran oo la yiraahdo "Xarunta Aqoonta Qaranka ee Dambiyada nacaybka" oo ku taal Oslo. Deegaanka khibradda leh ayaa mas'uul ka ah caawinta dhammaan degmooyinka boliiska ee horumarinta khibradda, iyo sidoo kale talada iyo hagidda kiisaska dembiyada. Degmo kasta oo booliisku waxay leedahay dad u heellan mas'uul ka ah nooca kiiska dembi nacaybka

Maxaa waaye dembi nacaybku?

Waxa dad badan u dareemaan nacayb had iyo jeer maaha dembi nacayb marka loo eego macnaha sharciga. Qeexitaanka booliiska ee dembiyada nacaybku waxa uu ku salaysan yahay sharci.

Falalka dembiyada ah ee si buuxda ama qayb ahaan ku saleysan nacayb, ama leh asalkooda sabab la xiriirta qof kale oo leh:

- Midabka maqaarka, asal qaran ama asal qowmiyadeed
- Diinta ama aragtida noloshu
- Jinsiga uu qofku jecel yahay
- Aqoonsiga jinsiga ama muuqaalkiisa
- Naafonimo ama awood la'aan jir ahaaneed ama maskaxeed

Haddii fal dambiyeedka uusan la xiriirin mid ka mid ah sababaha la ilaaliyo ee kor ku xusan, ma aha dambi nacayb. Waxaa laga yaabaa in weli la ciqaabi karo, laakiin kuma hoos dhacayo ereyga dembi nacaybka.

Maxaad samaynaysaa haddii aad tahay dhibane dembi nacayb?

Haddii aad la kulanto dembi nacayb, waa muhiim inaad ka hadasho. Waa kuwan waxa aad sameyn karto:

Booliska la xariir: Wac nambarka 02800 ama booqo booliska degmada

Booliska la xariir internetka: Waxa kale oo aad ka sheegi kartaa hadalada nacaybka onlaynka ah. politiet.no/tips

Taageero ka hel Xarunta Taageerada Dhibanayaasha Dembiyada:

iBilaash ka wac 800 40 008 waxay ku caawin karaan:

- Macluumaad iyo hanuunin ku saabsan dacwo dembiyeed
- Daba gal maskaxiyar bulsheed
- Taageero ilaa laga soo xareeyo warbixinta booliiska ilaa kiiska la xaliyo
- Taageerada markhaatiga ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib maxkamadaynta suurtogalka ah
- Magdhawga Rabshadaha

Macluumaad dheraad ku saabsan xaruumaha taagerada
<https://www.politiet.no/kontakt-politiet/stottesenter-for-kriminalitetsutsatte/>

Sideed ku aqoonsan kartaa dembi nacaybka?

Waa in uu jiro xiriir ka dhexeeya fal dambiyeedka iyo mid ka mid ah sababaha la ilaaliyo.

Calaamadaha muujinaya in wax laga yaabo in ay nacayb ku salaysan yihiin;

- ka shaki qabtaa in dhibka kugu dhacay uu ahaa dambi nacayb ku saleysan haddii:
- Waxaa lagu weeraray ama lagu geystay fal dambiyeed sababtoo ah waxaad ka tirsan tahay koox gaar ah (tusaale: diin, asal qowmiyadeed, jinsiga aad jeceshahay iwm)
- Qofkii falka geystay wuxuu adeegsaday hadallo nacayb ah ama ceebeyn ah oo liddi ku ah mid ka mid ah sababaha la ilaaliyo (sida midab, diin, jinsiga iwm)
- Dhacdadu waxay dhacday meel ama maalmo leh qiimo gaar ah oo la xiriira kooxda aad ka tirsan tahay, tusaale ahaan: intii lagu guda jiray bisha Ramadan
- Ma jirto sabab cad oo kale oo lagu sharaxi karo falkan - markaa nacayb ayaa loo malayn karaa inuu yahay sababta
- Adiga ama dadkii goob joogga ahaa waxay dareemeen in falka uu ku saleysnaa nacayb
- Waxaad horey u ogayd in qofka falka geystay uu horay u muujiyay nacayb ama aragtiyo xun oo la mid ah

Uma baahnid inaad hubto si buuxda - haddii aad shaki ka qabto, la xiriir booliiska

